RESET
Training and Support

# Bandhiga Hagida

Ee loogu talagalay soo dhawaynta Kafaalo Qaadida Bulshada

## Hordhac

Ka hor inta aadan akhrinin hagidaan, fadlan akhri buuga *ku Soo dhawoow* UK, kaas oo ku siin doono guudmarka UK iyo adeegyada kala duwan ayaad hadda heli doontaa in hadda dib laguu dejiyo. Hagidaan, waxaan isku daynay inaan lagu soo celinin macluumaadka labo dukumiinti. Taa beddelkeeda waxaan xooga saarnay kooxaha Community Sponsrship iyo sida kooxaha Community Sponsrship ay kala shaqayn doonaan adiga helida meelaha weyn ee taageerada.

Kooxaha Community Sponsrship waxay ka kooban yihiin mutadawixiin kuwaas oo shaqaynay bilooyin ama xitaa sanado ka hor imaatinkaaga inay ku sii helaan gurigaaga, cilmi baarista sida lagaa caawinaayo inaad hesho adeegyada iyo qorshaha sida ay kuu caawin doonto inaad gaarto madaxbanaani. Kooxahaan waxay mareen hanaanka adag ee codsiga Dowladda UK waxay u ansixisay inay noqdaan taageerayaasha ugu weyn. Waxay la shaqeyaan Dowladda UK iyo golahah deegaankaaga si loo qorsheeyo imaatinkaaga waxayna taageeri doonaan qoyskaaga ugu yaraan hal sano. Waxay hubinayaan guriyeyntaada ugu yaraan labo sano.

Kooxaha Community Sponsorship waxay heshiis la saxiixdaan Dowladda UK si taageero laguu siiyo adiga. Waxay oggolaanayaan inay:

- Ku siinayaan lacagaha bilwoga ah oo ah £200 qofkiiba ee ku jira qoyskaaga.  Ku siinayaan adiga kis-kis ilaa aad ka hesho ceyrtaada.
- Ku siiyaan taageerada isdhexgalka ilaa 24 bilood.
- Kuu raadinayaan hoyaga kaas oo la helaayo 24 bilood.
- Kaa caawiyaan diiwaangelinta faa'iidooyinka, diiwaangelinta GP-kaaga, iyo la xiriirada shirkaddaha maacuuntaada kululaynta biyaha, korontada iyo bixinta gaaska.
- Xaqiijiyaan carruurta in laga diiwaangeliyo dugsiga/iskuulka.
- Ku siinayaan fursadaha dadka weyn ay ku helaan 8 saac ee barashada luuqada Ingiriiska toddobaadkiiba ilaa 12 biloood.
- Waxay ku siinayaan fursadaha dhaqanka deegaanka, iyo ka caawinta raadinta shaqooyinka iyo fursadaha mutadawacnimada ah.
- Ku siiyaan helida turjumaan toddobaadka koowaad ee imaatinkaaga.

Kuwani ma ahan oo kaliya waxyaabaha kooxda Community Sponsorship ay kugu taageeri doonto adiga, lakiin waajiib ayay ku tahay inay sameeyaan.

Reset Communities iyo Refugees waa haya'add samofal ah. Reset waxay lacag ka heshaa waaxda Dowladda UK, Xafiiska Arrimaha Guddahaha, si loo abuuro ilaha (sida hagidaan oo kale) iyo tababarka kooxahaha Community Sponsorship wax ku saabsan sida taageerada kugu wanaagsan adiga iyo qoyskaaga. Reset waxay sidoo kale gaar ah ula kulmi doontaa

adiga iyo kooxdada dhowr jeer kadib marka aad timaado si loo hubiyo inaad si wanaagsan u degtay oo aad u weydiiso su'aalo ku saabsan dib u dejinta qof ka baxsan kooxdaada. Kulumadaan waxaa laguu qaban doonaa turjumaan aqoon leh iyadda oo la isticmaalaayo internet-ka ama teleefoonka.

Waxaan kugu soo dhawaynaynaa UK maadama aad qeyb ka tahay tirada kordhaysa ee dadka lagu soo dhawaynaayo Community Sponsorship.   Waxaan kuu rajanaynaa guul walba noloshaada halkaan.

# Turjumaanadda

Iyadda oo qeyb ka tahay codsiga Community Sponsorship, kooxdaada ayaa u sameeyn doontaa yabooh, qeyb ka mid ah lacagtaan waxaa loo isticmaali doonaa kharshaadka turjumista. Tani waxay bixin kartaa shakhsi -ahaan turjumaada aqoonta leh, teleefoonka, turjumaada onlaynka. Adeegyada turjumista ayaa noqon karaa qaali, sidaa darteed kooxaha waxay awooddaan inay ballaamiyaan turjumaan marka aadka loogu baahan yahay, sababtoo ah lacagaha oo xadidan.

Kooxo badan ayaa sidoo kale awoodda inay isticmalaan turjumaano mutadawaciin ah. Mararka qaar turjumaada mutawadaciinta ah ayaa si firfircoon qeyb ugu ah kooxda ama xubnaha bulshada deegaanka kuwaas oo ku hadla luuqadaada. Turjumaada mutadawaciinta lacag ma la siiyo oo waxaa laga yabaa lahayn xirfadaha aqoonta turjumaanka.

Adeeg bixiyaal badan ayaa kugu diyarin karaa turjumaano ballamahaaga. Tusaale aaan, dhakhtarka qaliinka ayaa isticmaali kraa turjumaanada teleefoonka, laakiin waxaa laga rabaa inaad u sheegto inaad rabto turjumaan marka aad ballanta qabsanayso. Haddii aad ballaan la leedahay isbitaalka, kadib wa inaad horey ugu sheegt haddii ad u baahan tahay turjumaan. Inta badan isbitaaladda ayaa ku qori shakhsi-ahaan turjumada inay ku soo biiraan ballanta, laakiin mar kale, waxaa laga rabaa inaad horey u sii ogeysiiso haddii aad u baahan tahay jinsiga gaarka ah ee turjumaanka. Jobcentre, kooxda ayaa laga rabaa inay bixiso lacagta turjumaanka-shakhsi ahaan kugu soo biiraya dhowrka ballamood ee ugu horeya kadib taas oo Jobcentre looga baahan doono inay u jadwalayso turjumaan ballamahaaga. Jobcentre waxay ballaan kartaa turjumaan haddii adiga ama kooxda ay weydisato in sidaa la sameeyo.

Adeega turjumista waxaa lagu bixiyaa lacag, xiriirka aad la leedahay turjumaanka adiga kaas oo mid aqoon leh. Haddii aad dareemayso inaad ku qanacsanayn turjumaanka, kadib waxaad u sheegi kartaa kooxda. Waxay ku xiran tahay xaalada, waxay ku raadin karaan turjumaan kale oo ka duwan.

# Waxbarashada

**Waxbarashada Caruurta**
Dhammaan carruurta ku nool UK waxaa laga raba inay dhigtaan dugsiga laga bilaabo da'da 5 (4 Waqooyiga Irelanda) ilaa 16, iyo Ingiriiska, dhammaan shakhsiyada jira 16-18 waa inuu midkooda ay dhigtaan dugsi ama shaqo la jaanqaadaysa waxbarashada. Dusgsiyadda badankooda waa isku lab halkaas oo wiilasha iyo gabdhaha ay isku dhinac fadhiistaan fasalada. Dugsiyada waa bilaash ilaa 18, si kasta ahaate, qaar ka mid ah dugsiyada ayaa khidmo qaata. Inta badan dugsiyada waa calmaani, laakiin sidoo kale waa bilaash, dugsi kale oo diiwaan ku lifaaqan ayey carruurtaada dhigan karaan.

Ka hor inta aadan imaanin, kooxdaada ayaa ku heli doontaa ugu yaraan mid ka mid ah dugsiyada aagaaga inuu boos u helayaan caruurtaada. Kani ma noqon karo dugsiga ugu dhaw gurigaaga, maadama dugsiyada ay leeyihiin boosaska xadidan ee ku jira koox sanad walba. Xubnaha kooxda ayaa u sheegi doonaa dugsiga ka hor imaataankaaga marka waxay qorshayn karaan inay sii carruurtaada caawinta dheerkaad ah ay u baahan yihiin inay kula qabsadaan fasaladooda.

UK, waaldiinta waxaa laa filaya inay ku lug yeeshaan waxbarashada ilmahooda xitaa carrururta dhalinta ah waxaa laga yaabaa in loo soo diro layliyadooda shaqada guriga. Qof ku jira kooxdaada ayaa ka caawin doonaa inaad la xiriirto bilowga dugsiga, marka waad garanaysaa waxaa laga filaayo waalid ahaan.

**Waxbarashada dadka waaweyn**
Maadama qofka weyn uu helaayo faayo-dhowrka ceryta adiga iyo dadka kale ee waaweyn qoyska waxaaa looga baahan doonaa inay dhigaan sideed saacdood oo fasalada luuqada Ingiriiska, sidoo kale waxaa loo yaqaanaa ESOL, toddobaad walba ilaa aad u diyaargarowdo inaad shaqo raadsato. Kooxdaada ayaa kuu diyaarin doontaa fasaladaan, waxay ku imaani karaan ilaha kala duwan ee barista. Tusaale ahaan, hal maalin waxaa laga yaabaa inaad xaadirto kuliyadda deegaanka iyo maalin kalena waxaa cashar gaar ah ku yeelan kartaa guriga. Macalimintaada ayaa qiimeyn doontaa xirfadahaaga luuqada. Haddii aad u baahan tahay caawinta xirfada waxbarashada, kooxdaada ayaa kugu xiri doonto ilaha aad u baahan tahay.

Barashada luuqadaha, gaar ahaan qofka weyn ayaa noqon kartaa mid aad u adag. Qaado waqtigaaga hana niyad jabin haddii aad horey u socon weyso sida ugu dhaqsiyaha badan ee aad jaceshahay.

Haddii aad wadankaaga kala timid xirfadda ama shahaadooyin aqooneed, kala shaqay kooxdaada sidii aad ugu wareejisan laheyd UK. Nasiib darro, qaar ka mid ah xirfadaha aqoonta laga helay UK ayaa la oggolyahay. Qaxootiyo badan ayaa awoodda inay dib u xaqiijiyaan xirfadooda kadib markay muddo joogaan UK, sidaa darteed weydii kooxda wixii ah caawin haddii tani ay tahay wax aad jaclaan laheyd inaad sii wado.

RESET
Training and Support

# Daryeelka Caafimaadka

*Buuga ku soo dhawoow UK*, waxaad ka helid macluuaadka ku saabsan Adeega Caafimaadka Qaranka (NHS) ee Ingiriska, Wales iyo Scotladna, ama Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee Northern Ireland adeegyadaas oo ku heli karto bilaash. Kooxdaada Community Sponsorship waxay durbo garanayaan halka sida aad isaga diiwaangelin kartaan adiga iyo xubnaha qoyskaaga dhakhtarka deegaanka, ee loo yaqaano GP, wuxuuna ku fududayn doonaan habkaan adiga. Hal ama labo ka mid ah xubnahah kooxda ayaa sidoo kale heli doonaa macluumaadka ku saabsaan xubnaha qoyskaaga xaaladda caafimaadka ee Qiimeynta Caafimaadka soo Galootigaaga, ay sameyso IOM ka hor inta aadan imaanin UK. Macluumaadkaan ma la wadaagi doonaan qof kale oo aan ka aheyn dhakhtarka aad ka diiwaangashan tahay. Macluumaadkaan waxaa lagu siinayaa ka hor safarkaaga si aad ugu wareejiso GP-ga marka aad la kulanto iyaga.

Haddii aad qabto xaaladda caafimaad oo aan degdeg-aheyn, waxaad weydiinsan kartaa kooxda inay ka caawiyaan ballan sameeysashada GP-gaaga kaas oo ku qori doonaa daawo ama ku gudbinaayo adeegyada takhasuuska haddii loo baahdo. Tan iyo markii uu bilowday cudurka safmarka ah, qaar ka mid ah GPs ayaa soo door bidaayo bukaanadda inay sameeyaan la tashiga hordhac ah ee onalynka, ama teleefoonka halkii ay shakhsi ahaan ka ahaan laheyd. Kuwo badan oo ah dadka cusub ayaa la yaabay mudada ay qaadan karto in la helo caawinta caafimaadka ee xaaaladda aan degdega-aheyn. Hubinta dhammaanka dadka Ingiriiska inay helaan daryeelka caafimaadka ee UK in sidoo kale ay la kulmayaan waqtiyada isku sugitaanka ee isku midka ah.

Madaama aad noqoneyso bukaanka cusub ee imaanaya UK, waxaa laga yabaa inaad hesho casuumaadda baaritaanada joogtada ah. Tusaale ahaan, haweenka waxaa lagu casuumaa baaritaanka ilmo-galeenka sadex sano walba da'da u dhaxeysa 25-49. La hadal kooxdaada ama GP-kaaga haddii aad qabto wax su'aalo ah oo la xiriira ballamahaan.

Wixi ah caawinta caafimaadka degdeg ah, waa inaad wacdaa 999 wixii ah xaaladdaha caafimaadka aan sugi karin ballamaha ballanta GP laakiin ma ahan xaaladda degdeg ah, waxaad wici kartaa 111 waxay ka caawin karaan inaad hesho caawinta aad u baahan tahay. Wixii ah xaaladdaha yaryar, sida hergabka, waxaad caawin warsan kartaa farmashiyaha deegaanka, laakiin waxaa laga yabaa inaysan qalajiye kuu siinin hergabka.

Sida lagu sheegay qeybta turumaanada ee hagidaan, adeegyada caafimaadka UK, marka laga reebo farmashiyaasha iyo dhakhtarka ilkaha, ayaa laga rabaa inuu ku siiyo turjumaan. Si kastaba ahaate, tani waxay noqon kartaa teleefoon ahaan. Waxaa laga yaabaa inaysan awoodin inay ku siiyaan turjumaan marka ballanta la sameeynaayo, ilaa aad ku qanacsanaato inaad adiga sameyso tani, xubnaha kooxdaada ayaa ku caawin karaan.

Daryeelka ilkaha waa kaabid laakiin bilaash maka ahan UK. Kooxdaada ayaa ka caawin doontaa adiga iyo qoyskaaga inaad iska diiwaangelisaan dhakhtarka ilkaha kaas oo kala hadli doonaa wax ku saabsan sida loo bixiyo lacagta. Hadda UK waxaa ka jiro liisaska sugida dheer ee dhakhtarkta ilkaha.

RESET
Training and Support

# Guriyeynta

Madaama barnaamijka uu qeyb ka yahay Community Sponsorshi, kooxdaada ayaa ku heysa guri ama guri isku xiran qoyskaagaa 24 bil ee xigta. Tani waxay ka dhigan tahay inaad guuraynin, ilaa aad rabto ma ahane, ugu yaraan labo sano.

Guriyeynta UK ayaa aad qaali u noqon kartaa, marka inta badan kooxaha ay la daaladhacayaan u helida qoysaskaaga ay tagaeeraan guri la awoodi karro – tani waxay noqon kartaa xaaladdaha kooxaada sidoo kale. Haddii aadan ku qancin guriga, waxaad u sheegi kartaa walaacyaada kooxda ama milkiilahaaga guriga, waxay sameeyn doonaan inay sameeyaan intii karaankooda ah isbeddelada surtagalka ah. Aad ayay ku caawin kartaa in la ogeysiiyo gollaha deegaanka inay ansixiso gurigaaga si loo hubiyo xaaladda wanaagsan iyo ku haboonaanta wanaagsan ee qoyskaaga. Haddii aad rabto inaad guurto, kooxda waajib ku ma ahan inay ka caawiyaan helida guriyo kale.

In kastoo aadan ku lug laheyn halida, guriga halkaas oo qoyskaagu joogaan waa guriga qoyskaaga, waxay masuul ka yihiin xaaladdaha kiradaada oo ay ku jirto bixinta kirada iyo u hogaansamida sharciyadda milkiilaha guriga, sida inaan sigaar lagu cabin guriga. Tani waxay sidoo kale ka dhigan tahay inaad adiga joogayso guriga. Adiga iyo qoyskaaga waxaad ku dari doonaan taabashada gaarka ah iyo sameeynta sharciyadaada (sida kabo iska bixinta). Kooxda waxay ka caawin doontaa inaad kala hadasho milkiilahaaga guriga iyadda oo lagu marinayo turkumaanka wax ku saabsan dayactirada ama su'aalaha aad ku qanacdo inaad adiga sameeyso tani.

Ilaa aad ka hesho guri, waxaad ku bixin doontaa kirada adiga oo isticmaalaya lacagta ad ka hesho Dowladda UK oo ay la socoto lacagta ceyrta taas oo si gaar ah loogu talo galay in lagu bixiyo kirada gurayaha. Tirada lacagta aad ka hesho dowladda ee loogu talagalay kirada waxaa laga yaabaa inay si buuxda u daboolaynin kharashka kirada, marka waxaa laga yaabaa kooxda inay bixiso farqiga u dhexeysa lacaga taas oo ay soo uruuriyaan 24 bilood, taas oo aan ugu yeerno ku shubida guriga.

Madaama ay qeyb ka tahay taageeradooda, kooxda waxay

- Ku siin doonaan alaabta guriga loogu talo galay
- Inay kugu sharraxaan heshiiska kirada luuqadaada
- Inay ku baraan sida loo raadiyo guriga wixii ka baxsan 24 bilood
- Ka caawinaya arrimaha xiriirka ee milkiilahaaga guriga
- Kaa caawiyaan dhisida xirfadaha lagu raadso guri 24 bilood kadib

Kooxda ma bixin doonto/waajib ma ku ahaan:

- Inay bixiso biilasha bilaha, oo ay ku jirto internet-ka
- Ka caawiso helid guri kale oo aad u guurto haddii adan ku qanacsaneyn
- Inay imaadaan gurigaaga iyaga oo aan soo sheegin – haddii ay sameeyaan, waxaad xaq u leedahay inaan u sheegto inaysan sameeynin tani.

RESET
Training and Support

# Heerka Sharciga

Marka aad u timaado UK sida qaxooti dib loo dejinaayo, adiga xubin walba oo qoyskaaga waxaa la siinaya fasaxa aan ka xadka laheyn (ILtR). Tani waxay ka dhigan in sharci ahaan laguu oggolaaday inaad ku joogto, shaqayso oo sheegato ceyrta UK. Adiga iyo qoyskaaga waxaad dooraan kartaa inaad joogaan UK inta aad rabtaan – si kastaba ahaate haddii muddo dheer ka maqnaato UK, waxaad wayn kartaa xaq aad u leedahay inaan joogto UK. Shan sano kadib imaantiinkaaga UK, adiga iyo qoyskaaga ayaa codsan karaa inaad noqotaan muwaadiniin UK waxaadna qaadanaysaan basaboorada UK.

Sida ku cad heerkaaga sharciga, adiga iyo xubnaha qoyskaaa ayaa loo sameeyn doonaa Oggolaanshaha Deganaanshaha ee Mcluumaadka Faraha (BRP). Kaarkaan ayaa loo isticmaali karaa sida cadeynta aqoonsiga, si loo xaqiijiyo inaad xaq u leedahay inay wax ku barato UK iyo xaqa aad u leedahay inaad hesho adeeg walba oo dadweyne ah ama ceyrta aad xaqa u leedahay. Si kastaba ahaate, ma ku filna warqaddaha dibada loogu safaro. Qof ku jira kooxda Community Sponsorship ayaa kuu soo qaadaya kararkaan sida ugu dhaqsiyaha badan kadib imaatinkaaga isla mariina siiya xubnaha qoyska. Haddii aad weyso kaarkaaga BRP, ama faafaahintaada isbeddeso, waa inaad ogeysiisaa Xafiiska Wasaraadda.

Haddii adiga iyo lamanahaaga aad heystaan carruur ku dhalatay UK, waxay yeelan doonaan heerka sharciga oo la mid ah kaaga. Marka ay dhashaaan, waa inaad dhalashooda ka diiwaangelisa gollaha degaanka kadibna aad ogeysiisa Xafiiska Wasaaradda Arrimaha Gudaha. Kooxdaada Community Sponsorship ayaa ka caawin doonaa adiga hanaankaan.

Haddii ad qabto su'aalo ku sabsan dib ula midowga ama ka keenista xubnaha qoyska dibadda si ay kugu la noolaadaan UK fadlan oggow tani ay aad u adkeysay sharciyadda socdaalka ee hadda. Kooxda ma go'aamin karto ama saameeyn ah ma ku yeelaan karto cida dib loo dejiyey UK – tani waxaa go'aamineysa oo kaliya Dowladda UK. Kooxda sidoo kale ma awoodda inay siiso talo sharci ama socdaalka, lakiin waxay kugu xiri karaan taliyaal aqoon leh, si kastaba ahaate, waajiib ma ku ahan inay bixiyaan lacagta adeegyaddan.

# Ceeryta

Marka ugu horeysa ee aad timaado UK waxaad u baahan doontaa inaad sameeyso codsi si aad u hesho faa'iidooyinka fayodhowrka ee laga helo dowladda UK; Kooxda Community Sponsorship ayaa ka caawin doontaa inaad sameeyso tani iyo sameeynta ballaanta qoyskaaga uu la yeelanayo Jobcentre. Lacagta koowaad ee ceyrta caadi ahaan waxay ku timaada lix bilood gudahooda sameeynta codsiga, laakiin waxay qaadan kartaa in badan tani.

Inta badan dadka ku nool UK ayaa waxay ka helaan ceyrtooda faa'iidooyinka Universal Credit – waa mid ka mid ah, lacagta bilaha ah ee dabooasha kharashka kirada, maciishada iyo gunadda carruurta (haddii aad heysto caruur), laakiin waxay ku xiran tahay daruufaha u qalmida ceryta kale – wax weydin kartaa taas Jobcentre.

Jobcentre ayaa ku weydiin doontaa buuxinta shuruudaha qaar si aad u sii wado inaad hesho ceryta haddii aad tahay da'da shaqaynayso. Tani waxaa loogu yeera sheegashada ballanta. Bilowdii barashada Ingiriiska ayaa noqon kartaa, laakiin in muddo ah waxaa laguu sheegi doonaa inay raadi shaqo iskaa ah ama mushaari ah. Cerytaada ayaa la joojinta haddii aad buuxin shuruudaha ama seegto ballamaha Jobcentre iyada oo aysan laheyn sabab wanaagsan.

Khimadda aad ka hesho ceyrta waxay ku xiran daruufahaaga gaarka ah, marka khidmooyinka qoyska way duwan tahay midba midka kale. Ma lagula dhaqmayo si gaar ah sababtoo ah waxaad tahay qaxooti – qoysaska Ingiriiska waxay leeyihiin ceryta la mid ah tan qoyskaaga oo kale. Kooxdaada saameyn ma ku yeelaan karto inta aad faa'iido aad helayso maadama tani ay go'aamiso dowladda. Miisaniyadda ceyrta ayaa adkaan karta, qoysas badan waxay la yaabeen khimada xadidan ee lacagta ay ka helaan Universal Credit. Kooxdaada ayaa ka caawin kartaa qorsheynta miisaniyada oo talo kaa siin karta si aad u sameeyneyso dookhyada dhaqaale ee micnahaha sameeynaya.

Marka aad bilowdo shaqo waa inaad u sheegta isla markiiba Jobcentre ceyrtaada waxaa loo dhimi si tartiib ah istarliin walba oo dheeraad ah oo hesho. Waa awoddoda, si kasta ahaate, hel xooga khidmo lacag ah iyadda lagu soo marinayo shaqada iyada oo aan saameynin faa'idooyinkaaga. Wixii ah macluumaadkan, waxaad la hadli karta kooxda ama Jobcentre.

RESET
Training and Support

# Shaqaalaysiinta

Waxaad xaq u leedahay inaad ka shaqayso UK maalinta ugu horeysa ee aad timaado waxaad helaysa BRP-kaaga, si kastaba, si toos ah ma laguu siin doono shaqo. Ku dhawaad dhammaan shaqooyinka UK waxay ka rabaan inaad ku hadasho Ingiriis, sidaa darteed dad badan oo ah ku cusub ayaa dooranaya inay xoogaa saaraan xirfadahooda luuqada ee Fasalka Ingiriiska iyo shaqada mutadawacnimada ka hor inta aysan raadinin shaqo mushaari ah marka waxay raadin karaan shaqooyin mushaar badan.

Shaqooyinka qaar waxay kaga baahan doonaan inaad leedahay aqoon ama heysto shahaado taas oo u baahan doonto inaad uga gudubto UK. Aqoono badan ma laga soo wareejin hal wadan oo ma loo soo wareejisan karo mid kale. Haddii aad leedahay xirfad gaar ah taas oo aad jaclaanlaheyd si aad wadato, hubi inaad weydiiso kooxdaada inay kuu aqoonsato waxaa laga baahan doono.

Hanaanka shaqo helida ee UK waxay ka duwanan kartaa wixii aan garan jirtay. Waa heerka badroonia inay ku weydiiyo CV mararka qaarna warqadda arjiga ama foomka codsiga. Musharaxiinta ku haboon ayaa lagu casumaya wareysiga shaqada halkaas loogu weydiinayo inay kaga hadlaan wax kiu saabsan naftooda sababta ay kugu haboon yihiin booskan. Kooxda ayaa ka caawin kartaa inaad barato wax badan oo ku saabsan hananka ama qodoba ururada maxaliga ah ee awoodda.

Xusuusnow marka aad bilowdo shaqada waxaad ogeysiin doontaa Jobcentre. Waxaad heli doontaa lacag badan shaqada waqtiga buuxda halkii aad ku tiirsanaan laheyd Universal Credit, laakiin waxaa lagugu dhiiragelinaya inaad xooga saarto marka koowaad barashada Ingiriiska si aad u hesho mustaqbalka shaqo wanaagsan.

# Ilaalinta Badqabka

Qof walba oo ku nool UK wuxuu xaq u leedahay badqabka iyo xadgub la'aan – haddii adiga ama qof aad taaqano inuu badqab aheyn ama xagdub la kulanto, waxaad la hadli kartaa kooxdaada. Kooxdaada mutadawaciinta ayaa kala hadli doontaa wax ku saabsan qaadista tallaaabada iyo soo sheegida arrinta marka waxaad helaysa caawinta aad u baahan tahay. Haddii aad soo sheegto xadgudub, ma heysan karaan tani iyaga, laakiin waxay ka caawin karaan inaad wax ka qabato arrinta si shakhsi ah oo aad ku qanacsan tahay.

Xubnaha kooxda Community Sponsorship ayaa kugu taageeraya si iskaa ah dalladda haya'ada samafalka ah sidaa darteeda waxaa laga rabaa inay ku soo wargeliyaan haya'adda haddii ay u maleeyaan inay khatar tahay.

Haddii aad ku jirto khatar degdeg ah, wac 999 – u sheeg shaqalahaaga luuqada aad ku hadasho, waxay awooddi doonaa inay khadka kuu soo geliyaan turjumaan.

Waxaan rajaynaynaa dhammaanka dadka ku nool UK inay kugu soo dhawayn doonaan xushmad iyo ixtiraamka, si kastaba ahaate, haddii aad la kulanto cunsuriyadda ama takoor, waxaad u soo sheegi kartaa booliska ama weydiiso kooxdaada inay ku caawiso.

Haddii aad jaceshay inaad sameeyso cabasho sharci ah oo ku saabsan xubinta kooxdaada, kooxda waxay leedahay cabashooyinka siyasadda si waxay wax ugu qabato cabasho walba qaab habaysan. Kooxda ayaa kugu siin doonto siyaasaddaan luuqadaada